

April 15, 2007

Ali Mahdi charged with the 1991 massacre of 98 Galgalle civilians, mostly seniors, women, and children, at the Mohamed Ali Ahmed school in Mogadishu. The fleeing civilians were captured in the Lower Shebelle, concentrated at the school and then fired at from all four sides. Their blood can still be seen on the walls of the school. When asked by the BBC to account for the massacre, Ali Mahdi responded that they deserved to die because they were the vestiges of the Siyad Barre dictatorship. Such crime is not covered by the Statute of Limitations which makes him a perfect candidate for the ICC, when he comes to Rochester, Minnesota, once a year, where he has family members.

Relatives of Mr. Yusuf Ibrahim Caddow (photo below) were victims of that horrific massacre. He provided the following account to Dayniile.

Yuusuf Ibraahim Caddow (Shabaab) "Dowladda federaalka ma ahan in shaqsi ka danbeeyey xusuuqa dad rayid ah in ay ku abaalmariso guddoomiyaha guddiga dib u heshiisiinta"



Yuusuf Ibraahim Caddow (Shabaab) oo ka mid ah siyaasiyiinta beesha Nuux Max'uud, kuna sugan dalka K/Afrika ayaa xiriir uu la soo sameeyey xafiiska boggan ee Muqdisho, wuxuu sheegay in ay nasiib darro tahay in dowladda federaalka ay u magacowdo ama u aqoonsato guddoomiyaha shirka dib u heshiisiinta Soomaaliya Cali mahdi Max'ed oo uu ku tilmaamay in uu yahay shaqsi geystay jariimooyin waaweyn oo ka dhan ah xuquuqda bini'aadamka, isla markaana aysan suurtagal aheyn in shaqsi xusuuqay dad rayid ah oo

aan waxba galabsan lagu abaal mariyo xil Qaran oo ah (National level).

Yuusuf Shabaab, wuxuu intaasi raaciyey in taariikhdu qoran tahay, qof walibana laga abaalmarin doono wixii uu geystay, wuxuuna xusay in waxgaradka & aqoonyahanada beesha Nuux Max'uud, gaar ahaan ehelada dadkii lagu xusuucay Ex. dugsigii sare Max'uud Cali Febraayo 1991 in ay u qorsheysan tahay in Cali mahdi ay la koraan maxkamadda, isla markaana ay diyaarinayaan dacwadaasi si loogu qaado buu yiri xilliga ugu munaasibsana.

"Cali mahdi wuxuu ahaa ninkii ka danbeeyey, xusuucii ka dhacay 1991-kii Ex. dugsigii sare ee Max'uud Cali Axmed, halkaasoo lagu xusuucay 73 qofood oo meel ah & 25 qofood, dadkaasoo ahaa waayeel, dhalinyaro & caruur, wuxuuna markii dadkaasi xusuucooda ay BBC-du weydiisay uu ku jawaabay in ay ahaayeen haraadigii Max'ed Siyaad Barre" ayuu yiri Yuusuf Shabaab oo sheegay in dadka la xusuucay ay u badnaayeen dad da' ah, lagana soo qabtay inta u dhexeysa S/hoose & J/hoose.

Wuxuu sidoo kale, sheegay in wixii Soomaaliya ka dhacay wixii ka danbeeyey ridistii dowladii MSBarre, tii ugu xumeyd in ay aheyd dhacdadii ka dhacay Max'uud Axmed Cali, oo dad shacab ah inta meel hool ah la isugu geeyey, rasaas 4-ta dhinac lagala maray, wuxuuna sheegay in ay jiraan odayaal caan ah oo goob joog ka ahaa markii uu falkaasi xusuuca ah dhacayey, qaarkoodna isku dayey inay hor istaagaan kuwii falkaasi geysanayey.

[Kala xiriir Yuusuf Shabaab +27 7323 16405](tel:+27732316405)